SATO VuokraKoti ★★★

Dayactirrada adiga samaysiga ah

Ma ogtahay inaad dib u cusboonaysiin karto gurigaaga SATO VuokraKoti (GuriKiro)?

Waxaan rajaynaynaa inaad ka heshay gurigaaga oo aad u qalabayn doonto si dookhaaga ah. Marka laga tago qalabka oogada, farnijarka iyo maryaha qurxinta gurigu waxay ku leeyihiin door wayn jawiga gurigaaga, haddaba, SATO waxay ku siin doontaa fursadda aad dayactir ku samaynayso abaarmenkaaga kirada ah oo adigu sidaas samayso.

Quruxda dayactirka adigu samaysiga ah, dabacan, waa kan aad adigu dooran karto alaabta. Haddii aad go'aansato inaad dib u nashqadayso gurigaaga, waxaad naga heli hagis shaqaynaysa, gaar ahaan alaabtaas, xulashada kuwa ku keeni kara madaxanuun qofka marmar sameeya cusboonaysiinaha.

HADDII AAD KA FIKIRAYSO INAAD ADIGU DIB U NASHQADAYN SAMAYSO, XASUUSNAW IN

- cusboonaysiinta kharashka adigu aad isku qabto
- adigu aad go'aanka leedahay, alaabta aad jeclaan lahayd inaad ku isticmaasho dib u nashqadaynta
  - haddii aad jeceshahay, waxaad dalban kartaa sad ah ranjiyeynta adigu-qabso ee SATO oo bilaash ah. Sadku wuxuu ka kooban yahay qalab shaqaynaya oo daruuri u ah ranjiyeynta. Haddii aad ku ranjiyeynayso gidaaradaada midabada gudaha ee SATO hore u diyaarisay, sidoo kale waxaad heli kartaa ranjiyo aad dhinacaaga kaga darto
- waa inaad ku ogaysiiso kormeeraha qoraal cusboonaysiinta adiga oo buuxinaya foomka kujira sato.fi/omatoimiremontti
- marka aad samayso dib u nashqadaynta, waxaad ogalaatay inaad ku dhaqanto tilmaamaha shaqada ee ay soosaaraan soosaarayaasha qalabka iyo SATO
- haddii dib u nashqadayntaadu ay ku keento dhaawac abaarmenka sababtuna ay tahay adiga oon ku dhaqmin tilmaamaha shaqada, waxa kugu waajib ah inaad magdhawdo dhaawaca
- waxaad oggolaatay inaanad lacag soo dallicin dib u nashqadaynta marka aad ka baxayso abaarmenka
- cusboonaysiinta adigu samaysiga ah looguma talogalay inuu beddelo cusboonaysiinta abaarmenka ee SATO, kuwaasi oo lagu sameeyo guryaha marka alaabta oogada gurigu ay taagan yihiin xilligii ay duugoobi lahaayeen
  - haddii gurigaagu leeyahay qolal uga baahan cusboonaysiin SATO, fadlan la xidhiidh maareeyaha guriga oo kala xaajoo xaaladda.

CUSBOONAYSIINTA ADIGU SAMAYSIGA AH

Ku wargeli kormeeraha gurigaaga cusboonaysiinta madaxabannaan kahor intaanad bilaabin shaqada adiga oo isticmaalaya foomka dalabka oo aad ka daabacan karto sato.fi/omatoimiremontti. Buuxinta foomku waa ku filan tahay cusboonaysiimaha soo socda:

- ranjiyeynta istansilka, oogada iyo ka aasaasig ah ee meelaha qallalan ee gurigaaga
- malaasidda gidaaradda ee meelaha qallalan ee gurigaaga
- ranjiyeynta gidaarada ranjiyeysan ee xamaamada iyo musqulaha gaarka ah ee gurigaaga
- ranjiyeynta waxyaalaha guriga ku rakiban
- beddelista albaabda iyo gacmaha waxyaalaha guriga ku rakiban
- ku dadista meesha dhexe ee siliiga farnijarka madbakha jiingado dahaadhan

haddii aad danaynayso samaynta cusboonaysiin adigu-qabso oo ka duwan liiska sare, fadlan la xidhiidh kormeeraha una sheeg rabitaankaaga. Tusaale ahaan beddelista sagxadaha dahaadhan ama ku beddelisa roog caag ah oo duug ah mid dahaadhan, wuxuu u baahan yahay ruqsan gaar ah oo aadka hesho kireeyahaaga, cusboonaysiinta sagxadda waa inaad xisaabta ku darsato, sidoo kale, istaandarrada raad fiican oo markaa, ku beddelisa rooga caaga ah mid dahaadh leh had iyo jeer suurogal inayna ahayn.

CUSBOONAYSIINTA ADIGU SAMAYSIGA AH

SATO waxay siin cusboonaysiiye madaxbannaan sadka ranjiilaha. Waxaad ku dalbi kartaa sadka adiga oo buuxinaya isla foomkii, kaasi oo aad u isticmaasho inaad ku dhawaaqdo dayactirka adigu-samaysiga ah. Waxaad ka heli kartaa foomka sato.fi/omatoimiremontti.

Marka uu helo foomka kormeeruhu waa kula soo xidhiidhi wuxuuna kuu sheegi halka aad ku isticmaali karto sadka ranji – kaasi oo ah xafiiska K-raua ama RTV.

Waxyaalaha sadku ka kooban yahay:

- tilmaamaha ranjiyeynta, warqad camuudeedka, butiga cusboonaysiinta, koofiyadda ranjiilaha, dhaqista ranjiga, koolada, taayirka ranjiga iyo gacantiisa, baadhe, sanduuqa burushka, qaadada simista.
- Sidoo kale waxaad ku haysan kartaa sadkaaga xaddi daruuri ah ee gunaanadka oogada ee Tikkurilan Nova 7, marka aad ku ranjiyeynayso gidaaradaada ranjiyada gudaha ee SATO hore u diyaarisay. Haddii aad isticmaalayso midabo kale, waxaad u baahan doontaa inaad ranjiga adigu gadato.
  - Ka hubi midabada gudaha ee SATO sato.fi/omatoimiremontti.
  - Kormeeruhu wuxuu qiyaasi doonaa xaddiga ranjiga kadib marka uu kaala hadlay ilaa xadka uu gaadhsiisan yahay cusboonaysiintu.

KU WARGELI JAARKA CUSBOONAYSIINTA

Cusboonaysiintu waa inayna u keenin dhaawac degganayaasha kale ee dhismaha.

Xasuusnaw inaad ogaysiiso cusboonaysiinta boodhka farriinta gurigaaga kahor maalin bilaabista shaqada. Waxaad dooran kartaa inaad adigu gabi ahaan qorto ogaysiiska ama inaad isticmaasho tambaleytka oo laga heli karo sato.fi/omatoimiremontti.

Ogaysiiska waa inuu ku qoran yahay macluumaad kusaabsan

- abaarmenka cusboonaysiinta lagu samaynayo
- macluumaadka la xidhiidhka ee qofka samaynaya cusboonaysiinta
- in shaqadu ay si aad u saamayn karto abaarmenada kale, tus. Buuq.

Dhig ogaysiiska dhammaan jaranjarooyinka dhismaha.

IL GOONI AH KU EEG ILAALINTA, SOOCISTA KHASHINKA IYO TAYADA ALAABTA CUSBOONAYSIINTA

Ilaali dhammaan oogooyinka gurigaaga iyo waxyaalaha dhismuhu ka kooban yahay kuwaasi oo ay suurogal tahay inay dhaawacmaan si aanay markaa u baabi'in ama u dhaawacmin inta cusboonaysiintu socoto. Ilaalinta waa in loo sameeyo si taxadar leh, taasi oo ah in dhashka dhismuhu aanu ku faafin meel ka baxsan meesha shaqadu ka socoto si kasta oo ay xaaladdu tahay.

Ku qub khashinka ay keentay shaqada dayactirku meelaha la buuxinayo ama xarunta khashinak lagu ururiyo adiga oo si adag u raacaya shuruucda ka yaal. Ku qub khashinka ranjiga ee dareeraha ah barta khashin ururinta dhibta dibna u isticmaal daasadaha madhan ama qallalan ama ku qub dhul khashin-qub. Wax khashinka cusboonaysiitna lama oggola inuu ku jiro weelka qashinka abaarmanka.

Isticmaal kaliya alaabta ku habboon cusboonaysiinta gudaha guriga. Waad ku beddeli kartaa alaabta aan ku talinay tilmaamahayaga shaqada laab la mid ah nooc iyo tayada.

XASUUSNAW INAAD KA MASUUL TAHAY CUSBOONAYSIINTA AAD SAMAYSAY

Degganaha samaynaya cusboonaysiinta adigu-qabso wuxuu oggolaaday inuu ku dhaqmo tilmaamaha shaqada ee soosaaraha alaabta iyo SATO. Degganuhu sidoo kale wuxuu oggolaatay inaanu soo dallicin cusboonaysiinta adigu samaysiga ah ee abaarmenka marka uu ka baxayo abaarmenka. Haddii shaqada aan la qaban iyada oo la raacayo tilmaamaha, degganuhu wuxuu oggolaatay inuu bixinayo kharashka ay keentay raadadka dayactirka, duminta iyo dib u nidaaminta suurogal ah ee shaqada qaladka ah.

MA HAYSAA SU'AALO DHEERAAD AH?

Kormeerahaagu wuxuu ku faraxsanaan doonaa inuu ka jawaabo su'aalaha guud ee kusaabsan cusboonaysiinta adigu-qabsiga ah. Tafaasiisha la-xidhiidhka kormeeraha waxa laga heli karaa adiga oo galinaya cinwaanka jidkaaga qaybta cinwaanka ee sato.fi/omakoti.

Internetku wuxuu taagan yahay qarka marka la eego tilmaamaha cusboonaysiinta ee dhabta ah. Hase yeeshee, raac tilmaamaha shaqada ee soosaarayaasha alaabta, iyo SATO, markaa natiijada u dambaysaa waa tayo sare iyo suurogalnimada inay waxa xumaadaa yaraadaan.

Waxaad ka heli doonta tilmaamaha ranjiyeynta websaytka Tikkurila, www.tikkurila.fi/kotimaalarit. Sidoo kale waxaad waydiin kartaa talooyin khadka ranjiga Tikkurila, taleefanka +358 10 860 8600, maalmaha shaqada 8 gh – 7 gd.

Dabcan waxaad ka heli doontaa dhiirigalin nashqadaynta gudaha guriga magaasiinka Kotona iyo websaytka magaasiinka ee sato.fi.

CUSBOONAYSIIN WANAAGSAN!